



RHS Modernization Project Director Newsletter #8

February 2015

Xilligii Deyrtu wuu ina soo hayaa iyadii oo aynu isu diyaarinayno dhismaha qayb ahaan howlihii loogu diyaar garoobayey bilowga dayactirka dugsiga Roosevelt. Howlaha lagu dayactirayo Dugsiga Sare e Roosevelt kol walba aad bay u badnayd walow bilaha soo socda ay noqon doonaan kuwa ugu mashquulka badan kolka la isu duwayo howlihii 18kii bilood ee la soo dhaafay ee qorshayn, qaabayn, iyo wadaag ahaa. Fadlan hoos ka akhri macluumaaad dheeri ah oo la xidhiidha waxa aad filayso iyo howlaha kale ee soo socda ee la xidhiidha mashruuca:

U diyaar Garowga Dhismaha

Dugsiga Sare ee Roosevelt waxa uu bulshada u yahay goob ay ku kulmaan bulshada - Waa uu buuxaa maalin walba oo todobaadka ah iyadii oo ay ka socddaan fasalo, barasho dheeri ah iyo howlaha kale ee bulshada. Waa aannu ognahay in dhismaha soo socda uu ku soo kordhinayo oo keliya cidhiidhi. Si hadaba loogu diyaariyo ardayda, qoysaska iyo xubnaha kale bulshada tan soo socota waxa aannu ku qaban doonaa laba kulan Roosevelt si aannu uga wada sheekaysano:

- Sidee howlahaa dhismaha aysan isu horaagin xarunta 2½ ee soo socda—*maxaa dhismaha saamayn doona halkeese ayeey noqonayaan goobaha ku meel gaadhka ah ee la adeegsan doono;*
- Maxay yihiin fursadaha iyo saamaynta uu dhismuhuku yeelan doono ardayda, qoysaska iyo bulshada degaanka—*Sidee ayeey ardaydu u badan doonaan qaabka dhismaha, halka gawaarida la dhigto oo xadidnaan doonta, marti gelinta manhaj dheeri ah iyo ciyaraaha fudud iyo barnaamijyada beesha ee la cadilay;*
- Sidee barnaamijyada iyo kuwa dheeriga ah ee Roosevelt loo horumariyey islamarkaana loo balaadhinayaa dhismaha qaybaha cusub.

Laba fursadood oo aad ka qayb geli karto:

- **Kulanka PTSA ee Roosevelt – February 18, 6:00 fiidnimo. Maqaayada Roosevelt**
- **Kulanka Dhismaha Bulshada – March 5, 6:00 fiidnimo. Maqaayada Roosevelt**

Qadiyadaha qaar waa looga sheekaysan doonaa labada fadhiba, kulanka PTSA waxaa xooga la saari doonaa kororka ardayda iyo qoysaskooda iyo sida uu u shaqayn doono dugsigu inta uu dhismuhu socda. Kulanka bulshada waxaa si qoto dheer looga hadi doonaa dhismaha deriska, sawaxanka, isu socodka shixnadaha. fadlan ka soo qaybal oo soo gudbi wixii su'aala ah ee aad qabto, adeegyada tarjumaaka ee luqadaha Spanish-ka, Soomaaligu iyo cunto fudud intuba waa ay jiri doonaan.

Bilowga Dhismaha

Imika oo aannu ku dhownahay bilowga dhismaha, waa aad inoo soo jiidanaya waxaa weeye dhagax-dhigida iyo shaqada bilaaban doonta. Maalinta dabaalgeda deyrtan iyo xafladuba waxa ay noqon doonaan, Sabtida, 2da, May. Dib ayaanu ugu qori donaa wixii macluumaad dheeri ah aqalka mashruuca: <http://RooseveltBond.pps.net> iyo wargayska mustaqbalka iyo waraaqaha bulshadu isu dawiyaan. Fadlan nala soco.

Haraadiga dhismaha: Ogolaashaha & Ku fadhiisinta Qiimaha ugu Sareeya (GMP)

Dhismaha mashruuc waxa uu u baahan yahay in ka badan qorshayn, qaabayn iyo samaynta sawirkha. Wuxuu kala oo ay doonaysaa in qaabaynta iyo nidaamka dhismuhuba ay la saan qaadaan miisaaniyada islamarkaana ay dowlada hoose ogolaato.

Imika tan ugu muhimsan waxaa qayb ahaan ka mid ah nidaamkii ogolaashaha oo loola jeedo in qaabka dhismaha yo shaqadaba ay degmadu ogolaato. Howshaasi waxa ay u baahan tahay kulamo badan iyo dodo si loo hubiyo in ay howsha loo qabtay sidii ay degmadu doonaysay iyo qaabkii ay u qodobaysay. Kooxda mashruuca, kolka lagu daro Bassetti Architects and Lease Crutcher Lewis (Kooxda aan caqdiga kula jirno), oo iyagu kol walba wax ka bedelayey howshaa si loo helo ogolaashaha shardiga u ah tani waxa ay naga caawinaysaa in mashruuca la ansixiyo oo uu ku socdo waqtigii loogu talagalay.

Waxaa dhici karta in qaar ay garanayaan "Kan Ugu Jaban" ee qaabka loo shaqaaleeyo caqdiile si uu u hirgeliyo shaqada dhisme guud, samaynta qaabka dhismaha, u gudbinta loolanka ka n ugu jaban, kadibna la siiyo caqdiilaha ugu jaban hirgelinta dhismahaa. Dhismahaa Roosevelt (iyo Qaybaha kale ee cusboonaysiinta Dugsiyada Guud ee Portland) waxa aannu adeegsanaa qaabab kala duwan oo lagu magacaabo "Construction Management/General Contractor" (CM/GC) si howsha loo dhamaystiro.

Nidaamka CM/GC ayaa noo ogolaanaya in aan shaqaalayno caqdiile, Iyadii oo loo maray nidaam tartan adag loo galay dhanka khibrada iyo aqoonta. Nidaamkan waxa uu faa'iido gaadh ah u leeyahay in la hubiyo in mashruuc dhisme xaga farsamadiisu adag tahay lagu dhameeyo waqtigii iyo dhqaalihii loo qorsheeyey. Wuxuu kala oo ay duwida caqdiilaha xile hore isaga iyo wadayiisa xaga qaabaynta. Tani waxa ay naga caawisay dhowr wallood oo ay ugu horayso in wax waliba waqtigii loogu talagalay dib u eegis lagu sameeyo, qiimeyn ta dhismaha, iyo wadaaga qaabaynta.

Laba wallood ay tayeynta xaga qiimaha kaabaya shaqada CM/GC, ama Damaanad qaadka Qimaha ugu sareeya (GMP). Qaybta ugu horaysa wa khibrada caqdiiluhu u leeyahay qiimeyn ta shaqadii la qaabeeyey. Tan labaad waa isu uruurinta qaybaha guud ee dhismaha tan oo kala saarideedu ay adag tahay iyadii oo la adeegsanay "Kan Ugu Jaban" Kolkii GMP la gaadhey, PPS waxa ay gaadhaysaa faa'idada qiimaha iyadii oo ay la socdaan xogtii oo qoraal ah.

Tani waxa ay doonaysaa shaqo badan, waxa ay mashruuca u badbaadinaysaa waqtii dadaal badan mustaqbalka

Tan iyo inta aannu xog kale iduin so gudbinayno...

Waannu iduin kaga mahad celinaynaa dhamaan warcelinada iyo ka qayb qaadashada aynu helaynay sanad iyo badhkii la soo dhaafay oo dhan inagii oo weli filayna qoysas iyo wejiyo cusub sii horumarinta dugsiyadeena. Wuxuu kala oo ay xasuusinaynaa inaad dhamaan macluumaadkan iyo kuwi horeba aad ka eegi kartaan: <http://RooseveltBond.pps.net>. Kol walba fadlan nala soo xidhiidh su'aal walba oo aad qabto rhsmod@pps.net.

Michelle R. M. Platter

*Capital Project Director – Roosevelt High School
“Go Riders!”*